



Dardaaranka Daryeel Caafimaad

Doorashooyinka oo la Ixtiraamo Minnesota

Waxa uu ka soo baxayaa shuruudaha Deganeyaasha Minnesota iyo Wisconsin

Dardaarankayga Daryeel Caafimaad

Waxa aan sameeyay dukumentigan aniga oo wax badan ka fiirsaday si aan u sheego doorashooyinka daweynta iyo rabitaankayga shakhsi haddii aanan rabitaankayga gudbin karin ama aanan naftayda u gaadhi karin go'aamo daryeel caafimaad. Waxa kale oo aan magacaabay wakiil daryeel caafimaad oo ii hadla. Wakiilkaygu waxa uu awoodaa inuu go'aamo caafimaad ii gaadho, oo ay ku jirto go'aanka inuu diido daweynada aanan rabin. Dukumenti kasta oo kan ka hor la sameeyay sharci ma aha ama waxba kama jiraan.

Magacayga: _____

Taariikhdayda dhalasho: _____

Adreeskayga: _____

Lambarkayga teleefonka: _____

Lambarkayga teleefonka gacanta ama moobilka: _____

Qaybta 1: Wakiilkayga Daryeel Caafimaad

Haddii aanan awoodin inaan sheego ama soo gudbiyo rabitaanadayda iyo go'aamadayda daryeel caafimaad sababta oo ah cudur ama dhaawac, ama haddii dhakhaatiirtayda ama bixiyeyaashayda daryeel caafimaad go'aamiyaan in aanan awoodin inaan naftayda u gaadho go'aamo daryeel caafimaad,* waxa aan qofka ama dadka soo socda u magacaabay inuu wakiil iiga ahaado rabitaankayga oo ii gaadho go'aamo daryeel caafimaad, oo uu ku jiro go'aanka inuu diido daweynada aanan rabin. Markii aan dooranayay wakiil daryeel caafimaad, waxa aan ka fiirsaday awoodda uu qofkani u leeyahay inuu isaga oo raali ka ah uu gaadho go'aamo isaga oo ka warqaba doorashooyinkayga xagga daweynta. Qofkani waa qof raaci karaa rabitaanadayda wakhtiyada ay jirto xasilooni-dari.

Wakiilkayga daryeel caafimaad ee koobaad waa:

Magac: _____

Waxa aanu isu nahay: _____

NAME, DOB, MRN

- 1 -

Teleefon (h) _____ Teleefon (c) _____

Teleefon (w) _____

Adrees: _____

- Waxa aan fahamsan ahay in wakiilkaygu aanuu noqon karin dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale ka tirsan bixiye daryeel caafimaad oo toos ii siiya daryeel ama siiya qof aanu is qabno, haddii qofkaas ah bixiye daryeel ee aan wakiilanayo aanuu naga dhexeynin xidhiidh dhiig ama guur, xidhiidh ah wehel ahaansho hoy oo diiwaansan, ama xidhiidh korsasho. Haddii wakiilkaygu yahay bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale ka tirsan bixiye daryeel caafimaad, sababta aan qofkaas u doortay waa tan:

Haddii aan joojiyo awoodda wakiilkayga koowaad ama haddii wakiilkayga koowaad aanuu raali ka ahayn, awoodin, ama loo heli karin si caqli-gal ah si uu iigu gaadho daryeel caafimaad, waxa aan wakiilkayga beddelka ah u magacaabay:

Wakiilka beddelka ah ee daryeelka caafimaadka:

Magac: _____

Waxa aanu isu nahay: _____

Lambarada Teleefon (h) _____ Teleefon (c) _____

Teleefon (w) _____

Adrees: _____

Awoodaha wakiilkayga daryeel caafimaad:

Wakiilkayga daryeel caafimaad waxa uu si toos ah u leeyahay dhamaan awoodaha soo socda marka aanan awoodin inaan naftayda u hadlo:

- Inuu sameeyo doorashooyin ku saabsan daryeelka caafimaadkayga. Waxan tan ku jira waxyaabaha ah: in la iga saaro ama aan la i galin tuubooyin quudin, baadhitaanno, dawooyin, qalitaano iyo go'aamo daweyn haddii aan uur leeyahay iyo dhamaan noocyada daweynta caafimaadka maskaxda, oo ay ku jiraan daweynada caafimaadka maskaxda ee leh daakhilaad ama dawooyin. Haddii daweyntu tahay mid bilaabantay, wakiilkaygu waa uu sii wadi karaa ama joojin karaa iyada oo ku saleysan fariimahayga.
- Waxa uu fasiri karaa fariin kasta oo aan ku bixiyay foomkan isaga oo raacaya waxa uu ka fahmay rabitaanadayda, waxa aan qiimeeyo iyo waxa aan rumeysan ahay
- Waxa uu fiirin karaa oo bixin karaa diiwaanadayda caafimaadka iyo faylashayda shakhsi ahaaneed taasoo ku xidhan daryeelka caafimaadkayga

- D. Waxa uu diyaarin karaa daryeelka caafimaadkayga iyo daweyntayda oo ah gudaha Minnesota ama gobolka kale oo kasta ama goobta uu u maleeyo inay haboon tahay. Waxa tan ku jira guryaha daryeelista iyo goobaha deganaanta ee ku saleysan beesha.
- E. Waxa uu go'aan ka gaadhi karaa kuwa ay noqon doonaan bixiyeyaasha daryeel caafimaad iyo hay'adaha i siin doona daweyn caafimaad

Faalooyin ama xadeyn ku saabsan qodobada sare (tusaale ahaan, dadka aad rabtid ama aanad rabin inay lug ku yeeshaan gaadhista go'aamo ay wakiil kaaga yihiin ama xadeyn ku saabsan awoodaha sare ee wakiilkaaga):

Awoodo dheeraad ah oo uu leeyahay wakiilkayga daryeel caafimaad: (Haddii aan rabo in wakiilkaygu yeesho mid ka mid ah awoodahan soo socda, waxa aan calaamad saari doonaa sanduuqa ku yaala xagga hore ee hadal kasta oo hoos ku yaala.)

- ⊙ Inuu diyaariyo oo go'aamo ka gaadho daryeelka jidhkayga ka dib dhimasho
- ⊙ Inuu sii ahaado wakiilkayga daryeel caafimaad xiitaa haddii hawlgal ah fasiqid, baabi'in ama joojin lagu hayo guurkayaga ama wehelnimada guriga ama la soo dhameeyay hawlgalkaas
- ⊙ Markii aan sidaas u wakiisho, inuu ii sameeyo go'aamo daryeel caafimaad xiitaa haddii aan awoodo inaan naftayda go'aan u gaadho ama u hadlo.

Boggan waxa laga rabaa kaliya deganeyaasha Wisconsin.

Dokumentiga Awoodda Wakiilnimo ee Daryeel Caafimaad

Ogeysiis ku Socda Qofka Sameynaya Dokumentigan: Waxa aad xaq u leedahay inaad gaadhid go'aamo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga. Lagama yaabo in lagu siiyo daryeel caafimaad haddii aad diidan tahay, isla markaana waxa dhici karta in daryeelka caafimaad ee lagama-maarmaanka ah aan la joojin ama la hakin haddii aad diidid.

Sababta oo ah bixiyeyaashaada daryeel caafimaad oo marrarka qaarkood ay dhici karto in aanay fursad u helin inay kula yeeshaan xidhiidh mudo dheer, badanaa lama socdaan waxa aad rumeysan tahay iyo waxa qiimaha kula leh iyo faahfaahinta xidhiidhkaaga qoys ahaaneed. Taasi waxay dhib keenaysa haddii jidh ahaan ama maskax ahaan aanad awoodin inaad gaadhid go'aamo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga.

Si looga baxsado dhibaataadaas, waxa lagaa rabi karaa inaad saxeexdid dokumentigan sharciga ah si aad u cadeysid qofka aad rabtid inuu kuu gaadho go'aamo daryeel caafimaad haddii aanad awoodin in adigu aad gaadhid go'aamadaas. Qofkaas waxa loo yaqaanaa wakiilkaaga daryeel caafimaad. Waa inaad xoogaa wakhti ah isa siisid oo aad fikradahaaga iyo waxa aad rumeysan tahay ee ku saabsan daweynta caafimaadka aad kala hadashid qofka ama dadka aad sheegtay. Waxa aad dokumentigan ku sheegi kartaa nooc kasta oo ah daryeel caafimaad oo aad rabtid ama aanad rabin, waxana aad xadeyn kartaa awoodda wakiilkaaga daryeel caafimaad. Haddii wakiilkaaga daryeel caafimaad aanuu ka warqabin rabitaanadaada ku saabsan go'aamo daryeel caafimaad oo gaar ah, waxa laga rabaa inuu go'aamiyo waxa danta ugu fiicani kuugu jirto marka uu gaadhayo go'aanka.

Kani waa dokumenti sharci ah oo muhiim ah. Waxa uu wakiilkaaga siinayaa awood balaadhan oo uu kuugu gaadho go'aamo daryeel caafimaad. Waxa uu laalayaa ama burinayaa awood wakiilnimo daryeel caafimaad kasta oo aad hore u bixisay. Haddii aad rabtid inaad beddeshid Awoodda Wakiilnimo Daryeel Caafimaad, waxa aad dib uga noqon kartaa dokumentigan wakhti kasta marka aad burburisid, ama adiga oo qof kale fara ama u sheegaa inuu hortaa ku burburiyo, ama marka aad saxeexdid ee aad taariikheysid hadal burin, ama marka aad laba markhaati hortooda ka sheegtid inaad dib uga noqotay.

Haddii aad dib uga noqotid, waa inaad ogeysiis siisid wakiilkaaga, bixiyeyaashaada daryeel caafimaad iyo qof kale kasta oo aad siisay koobi. Haddii wakiilkaagu yahay qof aad is qabtaan oo guurkaaga la baabi'iyoo ama aad is furteen ka dib saxeexidda dokumentigan, magacaabista ah in qof aad is qabteen yahay wakiilkaaga daryeel caafimaad waxa uu noqonayaa mid aanay waxba ka jirin.

Waxa kale oo aad dokumentigan u isticmaali kartaa inaad sameysid ama diidid deeq xubin jidh ka dib geeridaada. Haddii aad dokumentigan u isticmaashid inaad sameysid ama diidid deeq xubin jidh, dokumentigan waxa uu burinayaa diiwaan ama qoraal kasta oo hore oo ku saabsan deeq xubin jidh oo aad sameysay. Waxa aad dib uga noqon kartaa ama wax ka beddeli kartaa deeq xubin jidh oo kasta oo aad ku sameysid dokumentigan adiga oo xariiq marinaya qodobada ku saabsan deeq xubin jidh ee ku qoran dokumentigan.

Ha saxeexin dokumentigan adiga oo si cad u fahma mooyaane.

Waxa lagugula talinayaa in asalka dokumentigan uu kuu hayo dhakhtarkaagu.

NAME, DOB, MRN

- 4 -

Qaybta 2: Dardaarankayga Daryeel Caafimaad

Doorashooyinkayga iyo rabitaanadayda daryeelka caafimaadkayga waa sidan soo socota. Waxa aan wakiilkayga weydiisanayaa inuu wakiil ka noqdo, waxana aan dhakhaatiirtayda (iyo/ama kooxda daryeelka caafimaadka) weydiisanayaa inay ixtiraamaan, haddii ay dhacdo in aanan awoodin isgaadhsiin ama aanan awoodin inaan naftayda u hadlo. **Waxa aan calaamadeeyay sanduuqa hoose ee ku aadan ikhtiyaarka aan u doortay xaalad kasta.**

Fiiro: U ma baahnid inaad bixisid fariimo qoran oo ku saabsan daweynada ama la-tacaalista lagu dheereynayo noloshu, laakiin haddii aad sameysid waxa laga helaa gargaar. Haddii aad dooratid in aanad sameynin, waxa uu wakiilkaaga daryeelka caafimaadka sameyn doonaa go'aamo ku saleysan fariimahaaga hadal ama afka ah ama waxa uu ka soo qaado inay danta ugu fiicani kuugu jirto.

1. Daweynada lagu dheereynayo noloshayda

Haddii aan gaadho xaalad ah in aanan awoodin inaan naftayda u gaadho go'aamo isla markaana ay si caqli-gal ah u sugan tahay in aanay ii soo noqon doonin awood aan ku garto qofka aan ahay (Deganeyaasha Wisconsin, haddii aan qabo xaalad geeri suge ah ama aan ku jiro xaalad miyir la'aan oo joogto ah):

© Waxa aan rabaa inaan **joojiyo ama la hakiyo dhamaan daweynada** sii dheereynaya noloshayda. Waxa tan ku jira balse kuma koobna quudinta tuubada loo isticmaalo, dheecaanada faleebo ahaan (IV) loo bixiyo, mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka (CPR), iyo antibiyootikada.

ama

© **Waxa aan rabaa** dhamaan daweynada ama la-tacaalista haboon ee uu ku taliyo dhakhtarkaygu, ilaa dhakhtarkayga iyo wakiilkaygu ku heshiinayaan in daweynadaasi yihiin kuwo waxyeelo leh ama hadda ka dib aanay ahayn kuwo leh gargaar ama faa'iido.

Faalooyin ama fariimo loo sheegayo bixiyeyaasha daryeel caafimaad: _____

Mid kasta oo aan ka doorto labadaas doorasho, waxa aan fahmay inay ii socon doonto siinta daweynta xanuunka iyo wixii nafisaad leh, iyo waliba cunto iyo hooreyaal afka laga qaato haddii aan awoodo inaan wax liqo.

2. Dib-u-dhaqaajinta Wadnaha iyo Sambabka (CPR)

Dib-u-dhaqaajinta Wadnaha iyo Sambabka (CPR) waa la-tacaalis la isticmaalo si la isugu dayo in la soo celiyo dhaqdhaqaaqa wadnaha iyo/ama neefsashada marka ay joogsadaan. Waxa ku jiri kara cadaadin laabta ah (laabta oo xoog loo riixo si wadnuhu u sameeyo isku ururid), dawooyin, shoog koronto (electrical shocks), iyo tuubo neefsasho. Waxan fahamsan ahay in dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka ay badbaadin karto nafta qof. Waxa kale oo aan fahamsan ahay in aanay si fiican ugu shaqeyn dadka qaba cuduro soo jiray mudo dheer iyo/ama dadka leh shaqeyn jidh oo dhibaateysan ee aan is daryeeli karin. Waxa aan fahamsan ahay in ka-soo-fiicnaanta saameynta dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka ay noqon karto mid leh xanuun iyo dhib. Sidaa daraadeed:

© **Ma rabo in dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka** la igu dayo haddii wadnahaygu joogsado ama neefsashadaydu joogsato, laakiin beddelkeeda, waxan rabaa in la oggalaado geeri dabiici ah.

ama

© **Waxa aan rabaa in la igu dayo dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka haddii dhakhtarkaygu** aanu go'aamin *mid* ka mid ah kuwan:

- Waxa aan qabaa cudur ama dhaawac aan laga bogsan karin waana aan dhimanayaa. ama
- Ma lihi suurtoagal noolaansho oo caqli-gal ah haddii wadnahaygu joogsado ama neefsashadaydu joogsato. ama
- Waxa yar suurtoogalka inaan sii noolaado mudo dheer haddii wadnahaygu joogsado ama neefsashadaydu joogsato isla markaana hawlgalka dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka waxa uu keeni doonaa xanuun ama waxyeelo laxaad leh.

ama

© **Waxa aan rabaa in dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka la igu dayo haddii wadnahayga** ama neefsashadaydu joogsato.

3. Doorashada Daweynta ama La-tacaalista

© Waxa aan halkan soo raaciyay ikhtiyaaradayda daweynta ee ku saabsan xaaladayda ama xaaladahayga caafimaad ee gaarka ah. Hadaladani waxay sheegayaan doorashooyinkayga daweynta. Nooc daweyn kasta oo aan doorto, waxa aan fahamsan ahay inay ii socon doonto siinta dawooyinka xanuunka iyo nafisaad helidda, iyo waliba cunto iyo hooreyaal afka la iga siiyo haddii aan awoodo inaan wax liqo.

NAME, DOB, MRN

- 6 -

Qaybta 3: Rajooyinkayga iyo Rabitaanadayda (Ikhtiyaar)

Waxan rabaa in ehelkayga iyo dadka i jecel ogaadaan fikradahan iyo dareenadan soo socda:

1. Waxyaabaha nolosha iiga dhiga mid u qalanta inaan sii noolaado waa:

2. Waxa aan rumeysan ahay in aan noloshu istaahilin mid sii jirta marka ay jiraan waxyaabahan:

3. Dooroshooyinkayga ku saabsan daweyn ama la-tacaalis gaar ah, haddii ay jiraan (waxa tan ku jiri kara rabitaanadaada ku saabsan mishiinada neefsashada, sifeynta kaadida (dialysis), antibiyootiko, quudinta tuubo la isticmaalayo, iwm.):

4. Fikradahayga iyo dareenadayda ku saabsan sida aan rabo inaan u dhinto iyo goobta aan rabo inaan ku dhinto waa:

5. Haddii aan dhimasho ama geeri ku dhowaado, waxan aan rabaa in dadka i jecel ogaadaan inaan jecelahay in la ii qabto waxyaabahan ah nafisaad ama xanuun-yareyn iyo taageero (hawlgalo cibaadaysi, tukasho, muusig, iwm.):

6. Diintaydu waa:

Waxan ahay _____ diin ahaan, waxana aan xubin ka ahay _____ oo ah beel ama jimciyad diineed (magaalo) _____. Fadlan isku day inaad ogeysiisid geeridayda oo aad abaabushid si ay u qabtaan tacsidayda/xuskayga/aasidayda. Waxan jecelahay, hadday suurto gal tahay, in tacsidayda ay ku jiraan kuwan (dad, muusig, hawlgalo cibaadaysi, iwm.):

7. Deeqid xubin jidhayga ah (waxba ha ku qoran haddii aanad wax doorasho ah sameynaynin):

_____ Waxan rabaa inaan deeq u bixiyo indhahayga, unugyo iyo/ama xubnaha jidhkayga, haddii ay suurto gal tahay. Rabitaanadayda gaarka ah waa (hadday jiraan):

_____ Ma rabo inaan deeq u bixiyo indhahayga, unugyo iyo/ama xubno jidh.

Qaybta 4: Awood Sharci

Marka la fiiriyo sharciga Minnesota, waa inaad dukumentigan ku hor saxeexdid oo ku hor taariikheysid laba markhaati ama nootaayo dadweyne (notary public). **Deganeyaasha Wisconsin waa inay dukumentigan ku hor saxeexaan oo ku hor taariikheeyaan laba markhaati. (Gudaha Wisconsin, Shaqaalaha Bulshada iyo wadaadada ayaa kaligood ah bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee noqon kara markhaati.)**

Aniga oo xor ah ayaan sameeyay dukumentigan; waxan u fikirayaa si cad, waxana uu dukumentigani sheegayaa rabitaanadayda ku saabsan go'aamadayda daryeel caafimaad ee mustaqbalka:

Saxeex: _____ Taariikh: _____

Haddii aanan saxeexi karin magacayga, waxa aan weydiisanayaa qofka soo socda inuu ii saxeexo:

Saxeexa (qofka la weydiisto inuu saxeexo): _____ Taariikh: _____

Cadeynta Markhaatiyada: Aniga ayaa shakhsiyan shaahid ka ahaa ama arkayay saxeexidda dukumentigan. Waxa aan cadeynayaa in dukumentigani aanuu ii magacaabin inaan noqdo wakiil daryeel caafimaad.

Haddii aan ahay bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale ka tirsan bixiye daryeel caafimaad oo daryeel toos ah siinaya qofka kor ku qoran, waa inaan xariiqdan ku qoraa xuruufta ugu horeysa saddexdayda magac ama magacyadayda (initials): _____. Waa in ugu yaraan hal markhaati aanuu ahayn daryeel bixiye ama shaqaale ka tirsan daryeel bixiye oo daryeel toos ah bixinaya maalinta dukumentigan la saxeexo.

Markhaatiyada Wisconsin qofka kor ku qoran lama lahaan karaan xidhiidh ah dhiig, guur, korsasho ama wehelnimo qoys, maalka qofka kuma lahaan karaan sheegasho ama si toos ah dhaqaale ahaan mas'uul uguma noqon karaan daryeelkooda.

Markhaatiga Koobaad:

Saxeex: _____ Taariikh: _____

Magaca oo ah xuruuf kala go'an _____

Adrees _____

Markhaatiga Labaad:

Saxeex: _____ Taariikh: _____

Magaca oo ah xuruuf kala go'an _____

Adrees _____

Nootaayo Dadweyne:

Aniga hortayda _____ (taariikh), _____ (magac) waxa uu qiray saxeexiisa ama saxeexeda ku qoran dukumentigan ama waxa uu qiray inuu awood u siisay ama u siisay qofka saxeexaya dukumentigan inuu wakiil ahaan ugu saxeexo. Ma ahi qof dukumentigani u magacaabayo wakiil daryeel caafimaad.

Saxeexa nootaayada: _____

Shaambadda Nootaayada:

Qaybta 5: Talaabooyinka Xiga

Imminka mar haddii aad buuxisay dardaarankaaga daryeel caafimaad, waa inaad sidoo kale qaadid talaabooyinka soo socda.

- U sheeg qofka aad u magacawday inuu kuu noqdo wakiil daryeel caafimaad, haddii aanad taa hore u sameynin. U hubso in qofkaasi awoodo inuu mustaqbalka kuu qaban karo shaqadan muhiimka ah.
- Koobi ah dardaarankaaga daryeelka caafimaadka sii wakiilkaaga daryeel caafimaad.
- La hadal qoyskaaga intiisa kale iyo saaxiibada kuu dhow ee laga yaabo inay arrimahaaga lug ku yeeshaan haddii aad qabtid cudur ama dhaawac culus. U hubso inay yaqaanaan qofka uu yahay wakiilkaaga daryeel caafimaad, iyo waxa ay yihiin rabitaanadaadu.
- Dhakhtarkaaga sii koobi ah dardaarankaaga daryeel caafimaad. U hubso in la fahmo rabitaanadaada oo la raaci doono.
- Koobi ah dardaarankaaga daryeel caafimaad ku hayso meel si fudud looga heli karo.
- Haddii aad tagtid cisbitaal ama hoy daryeel, sii qaado koobi ah dardaarankaaga daryeel caafimaad oo weydiiso in lagu daro diiwaankaaga ama faylkaaga caafimaadka.
- Dib u fiiri rabitaanadaada daryeel caafimaad wakhti kasta oo lagu sameeyo baadhis jidh ama markasta oo mid kasta oo ah kuwan dhacaan:
 - Toban sanno oo cusub – marka toban sanno oo cusub u bilaabmaan nololshaada.
 - Geeri – markasta oo dhimasho ama geeri ku dhacdo qof gacalkaaga ah ama aad jeceshay.
 - Furitaan – marka uu kugu dhaco furitaan ama isbeddel qoys oo weyn oo kale.
 - Cilad-sheegid – marka lagugu sheego xaalad caafimaad oo culus.

- Hoos-u-dhac – marka xaalad caafimaad oo aad qabtay si weyn u sii xumaato ama ka sii darto, gaar ahaan marka aanad awoodin inaad kaligaa noolaatid.

Koobiyo ah dokumentigan waxa la siiyay:

Wakiilka Daryeel Caafimaad ee Koobaad – Magac: _____

Teleefon: _____ Teleefon Gacan/Moobil: _____

Wakiilka Daryeel Caafimaad ee Beddelka ah – Magac: _____

Teleefon: _____ Teleefon Gacan/Moobil: _____

Bixiye Daryeel Caafimaad/Xarun:

Magac: _____ Teleefon: _____

Magac: _____ Teleefon: _____

Magac: _____ Teleefon: _____

Haddii rabitaanadaadu is beddelaan, buuxi foom dardaraan daryeel caafimaad oo cusub oo u sheeg wakiilkaaga, qoyskaaga, dhakhtarkaaga, iyo qof kasta oo koobi ka haysta waraaqihii hore ee dardaarankaaga daryeel caafimaad.

Micnaha ereyada qorsheynta hore ee daryeelka

Somali

Antibayootika

Daawooyin la dagaallama infekshinta (oof-wareenka, tusaale ahaan).

Daraaranka daryeelka caafimaadka

Dukumenti aad adigu sameyso oo sheegysa in daawooyinka caafimaad iyo tallaabooyinka nolosha-haya aad adigu jeceshahay ama aadan jeclayn hadii xaalad dhammaadka-noloshu dhacdo.

BiPAP (cadaadis hawo-mareen qumman laba-heer leh)

Daawayn lagu bixiyo waji-gashi (maaskaro) iyada oo lagu galiyo si lagaaga caawiyo neefsiga. Waji-gashiga ayaa si fiican u le'eg sankaa iyo afkaaga.

Horay u soo samayn wadno-sambabbo shaqo ugu soo-celin (CPR)

CPR waa hab-socod hawl gargaar deg-deg ah si uu wadnahaagu u ku sii wado shaqeynta oo oksijiintu ku shubanto maskaxdaada. Qaab-socodka ayaa ka mid ah qofka kale oo ku neefsada afkaaga oo riixa xabadkaaga (shafkaaga). Iyada oo la isticmaalo daawo iyo qalab gaar ah sidii loo siin lahaa ka-gariirin koranto wadnaha si u wadnuhu shaqeeyo. Iyada oo la dhex dhigo tuubbo dhuuntaada sidii ay kaaga caawin lahayd neefsiga.

Dialysis (Kaadida ka Sifaynta Dhiigga)

U isticmaalka mashiinka si loo nadiifiyo dhiiggaaga marka ayn akelyahaagu si caadi ah u shaqaynaynin. Kelyahaaga ay ka caawiya jidhkaagu inuu iska saaro waxyaabaha qashinka ah iyo dareeraha dheeraadka ah ee ku jira dhiiggaaga.

Laynka IV-ga (xididka layska siiyo)

Tuubbo aad u dhuuban, oo jilicsan oo caag ah ayaa la dhex galinayaa xidid. IV-gu waa dariiq lagugu siiyo dareeraha, dhiigga iyo dawada.

Taageero nafaqeed iyo biyayn

Isticmaalka IV-ga ama tuubbooyinka ku siiya cuntada(nafaqada) ama biyo haddii aadan wax cuni karin ama cabbi karin.

Quudinta tuubbada

Isticmaalka tuubbada la dhex dhigo sankaa ama calooshaada. Tuubbada ayaa bixisa dariiq lagugu siiyo cuntada iyo dareerayaal haddii aadan liqi karin si caadi ah ama aadan qaada karin cunto iyo biyo kugu filan.

Hawo-siiyaha

Waa mashiin ku riixa hawada iyo oksijiinta sambabbadaada sidii ay kaaga caawin lahayd neefsiga haddii aadan u nefsan klarin iskaa. Mashiinka ayaa ku xiran tuubbo afka inta lagaa galiyo oo dhex marta hawo-mareenka oo xagga dambe ee cunaha iyo dhuunta ah.

Heerka Koodhka

Ereyo ay isticmaalaan dadka caafimaadka ka shaqeeya sidii ay u sifayn lahaayeen hawlaha la samayn karo haddii qofka wadnihisu istaago ama sambabbadu shaqadooda gabaan. Heerka koodhka waxa ka mid kara ereyada DNR, DNI ama CPR.

- *DNR (Dib ha u kicin wadnaha ah)* Ha isticmaalin CPR haddii u qofku neefsanayo ama garaaca wadnihisu istaago.
- *DNI (Ha isticmaali tuubbada hawada)* Ha dhex galinina tuubbo neefsi dhuunta si looga caawiyo neefsiga.
- *Isbitaal ha dhigina* Ha seexin qofka isbitaalka inuu ku baryo.s

KA SII SOGDA DHABARKA

Micnaha ereyada qorsheynta hore ee daryeelka

KA YIMID XAGGA HORE

Daryeelka Raaxada

Daryeelka iyo daaweynta caafimaad ee xanuunka iyo calaamado ka reyska deg-degga ah ee ka gaabiya taagerada hawo-siiyaha, nafaqaynta/ biyaynta aan dabiiga ahayn, iyo dib-ugu-celin seexinta isbitaalka. Daaweynta iyo daryeelka ayaa sida caadiga ah lagu bixiyaa jawi beel ahaaneed oo waxa ku jiri kara oksijiinta iyo dawo u siinta ka reysiga xanuunka iyo calaamadda.

Wax-ka-qabasho xaddidan

Daryeelka caafimaad ee loogu talagalay daaweynta cudur/dhaawac cusub ama jiray marka cudurka loo qaddarinayo inuu yahay mid laga bogsan karo. Daaweyn kasta oo kadeedan ama bilaa-raaxda ah ayaa lagu bixinayaa tijaabo waqti-xaddisan

Daryeelka xanuun naaquska

Daaweynta lagu bixiyo tallabooyin u fudueynta loogu talagalay kaliya, sidii looga raysan lahaa calaamdaha halkii loo siin lahaa in laga bogsado cudurka.

POLST (Bixiyaha Dalba Daawaynta Nolaanta Taageera)

Foomka amarka caafimaad ee la saxeeay ayaa u gudbineysa waxyaababaha u rabo qofka buka daryeelkiisa caafimaad ee dhammaadka nolosha bixiyeyaasha kale ee daryeel caafimaad markay jirto xaalad imerjansi ah.

Hagaha qorsheynta hore ee daryeelka

Ma jiro dariiq sahlan oo lagu qorsheysto kala-doorbidityada daryeelka caafimaad ee mustaqbalka. Waa nidaam ay ka mid yihiin ka fakarka iyo ka hadalka arrimo culus oo xasaasi ah.

Adigu waxaad xaq u leedahay inay kooxdaada daryeel kuu sheegaan arrimaha ku saabsan waxyaabaha aad ka kala dooran karto caafimaadka. Waa inay waliba kuugu faahfaahiyaan waxtarka iyo halista iman kara qaab aad adigu fahmi karto.

Waxa kale oo aad adigu xaq u leedahay inaad aqbasho ama aad diiddo kala doorashadan. U isticmaal hagahan si u kaaga caawiyo la wadaagga dareenkaaga kooxdaada daryeel caafimaad, qoyskaaga, asxaabtaada iyo la-taliyeyaasha diineed ama ruuxiyanka ah. Ka fikir waxa ku saabsan daaweynta aad adigu rabto. Si kasta oo aad wax ugu go'aansato, waa muhiim inaad ka hadasho arrimaha ku saabsan wax kala doorashada dadka adigu kuugu dhow. Waxa kale oo dhici karta inaad wax kala doorashada aad qoraal ahaan ka dhigto.

Wax fudud ma aha in laga hadlo arrimahan. Laakiin waxa laga yaabaa markay tahay qoyskaaga iyo dadka aad jeceshahay, inay kaga sii adkaato go'aan gaaritaanku iyga oo aan ogaan waxaad rabto.

Dardaaranka daryeelka caafimaadka

Waa maxay dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Dardaaranka daryeelka caafimaadku waa qorshaha aad ugu samaysato daryeelkaaga caafimaad ee mustaqbalka. Waxa mararka qaarkood loo yaqaan dardaaranka hore.

Qorshahan, waxaad ku sharaxayssa kala doorashada daaweyntaada. Waxaad u magacaabi kartaa qof adiga kuu sameeya kala doorashada haddii aadan adigu samaysan karin. Qofkan ayaa adiga kuu ah wakiilkaaga dardaraan daryeelka caafimaad. Waxaad gashan kartaa nuqul ah dardaaranka daryeelkaaga caafimaadka diiwaankaaga caafimaad.

Adiga qasab kuguma aha inaad samayso dardaraan daryeelka caafimaad. Haddii aad doorato inaad yeelan, wali waxaad heli doontaa daryeelka aad u baahan tahay.

Sideen ku helaa dardaraan daryeelka caafimaad?

Weydiiso dhakhtarkaaga foomka dardaraan daryeelka caafimaad. Waxa kale oo aad ka daabacn kartaa foomka www.MetroDoctors.com.

Goorma ayaa lagu camalfali doonaa dardaarankayga daryeelka caafimaad?

Ilaa inta aad iskaa wax u kala dooran karto, adiga ayaa gacanta ku haysta daryeelkaaga caafimaad. Haddii aadan iskaa wax u kala dooran karin, kooxdaada daryeel

caafimaad ayaa raaci doona wax aad rabtay ee ku sifeysnaa dardaaranka daryeelka caafimaad.

Ma beddeli karaa dardaarankayga daryeelka caafimaad?

Haa. Waad beddeli kartaa waqti kasta illaa intaad adigu iskaa go'aannada u samaysan karto. U sheeg wakiilkaaga daryeelka caafimaad iyo kooxda daryeelkaaga wax isbeddeladaada.

Ayaan u doortaa inuu aniga ii noqdo wakiilka daryeelkayga caafimaad?

Dad badan ayaa u doorta xubinta qoys oo ku dhow ama saaxiibkood. Qofka aad dooraneysaa waa inuu noqdaa qof:

- Aad aammini karto
- Oggol inuu qaado xilka
- Raaci kara waxyaabaha aad rabto xitaa haddii uuna qofku ku raacsnayn arrinta
- Iska xajin kara ku samaynta go'aannada adag hoostooda xaalado adag

Waxa laga yaabaa inaad qof kalena u doorto haddii ay dhaco qofka ugu horreeya ee aad dooratay uuna karin ama rabin inuu adiga kaa wakiil noqdo. Badiyaa, hal wakiil ayaa howsha haya kolba waqti. Lakiin waxa laga yaabaa inay habboonaato in lagala hadlo labada qofba iyada oo la wada joogo arrimaha wax doorashadaada.

KA SII SOCDA DHABARKA

Hagaha qorsheynta hore ee daryeelka

KA YIMID XAGGA HORE

Maxaa dhacay haddii aan dhaawacmo ama aan xanuunsado markay ka maqan yihiin guriga?

Hubi inaad kala hadasho waxyaabaha aad dooratay wakiilkaaga daryeel caafimaad. Wakiilkaaga ayaa waliba ah inuu haysto nuqul ah dardaarankaaga daryeel caafimaad sidii ay uga caawin lahayd in la hubiyo helitaanka daryeelka aad aad rabto.

Maxaa dhacaya markay xaalad emerjansi ama deg-deg ahi timaad?

Markay xaalad emerjansi ahi timaad, kooxda daryeelkaaga caafimaad ayaa laga yaabaa inay kuu bilowdo daaweyntaada si noloshada loo dheereeyo. Kooxda daryeelka caafimaad ayaa joojin doona daaweynta haddii ay ogaadaan waxyaabaha aad ka rabto dardaaran daryeelkaaga caafimaad.

Ma uga baahanahay looyar si aan dhammaytiro dardaaranka daryeelka caafimaad?

Maya. Sharcigu kaagama baahna inaad lahaato looyar.

U Qorsheynta Hore Daryeelka

Sideen ugu qorsheysan karaa xaaladaha caafimaadka mustaqbalka?

Uma qorsheysan kartid dhacdo kasta. Laakiin qasab ma aha inaad sidaas sameyso. U qorsheyso xaaladaha aad adigu:

- Ku soo booddo ahaan aanad go'annadaada aadan samayn karin
- Ay u badan tahay inaad ka soo kaban karin
- Kugu dhaceen dhaawac halis ah ama waayitaanka hawlgalaka waaxeed (tusaale ahaan, dhawac maskaxeed oo shil ku yimid, faalig ama cudur guurgursha leh, oo ka midka yahay Asaasaqa [Alzheimer])

Sideen ugala hadli karaa xaaladahan oo kale dadkayga iigu dhow?

Marka hore, adigu qorsheyso. Markaana qoyskaaga ama asxaabtaada ogeysii waxa aad rabto. U sheeg dadka aad jeceshahay inaad rabin inay dareemaan culeys ka saarma markay go'aannada adiga kuu sameynayaan. Markaa, weydii iyagu inay kuu sheegaan waxay iyagu u rabaan laftooda?

Ayaan la hadlaa?

La hadal kuwa ay u badan tahay inay arrinta ku jiri doonaan haddii aad xanuunsato. In kasta oo aad isku dhowdhihiin kaliya ma aha micnaheedu inay dadka gacalkaaga ahi yaqaaniin waxa aad ka rabto daryeelka caafimaadka mustaqbalka. Haddii aad u baahan tahay

inaad la hadasho qoyska iyo asxaabta, weydii kooxdaada daryeelkaaga haddii aad la hadli karto arrimo fudeydiye.

Maxaan ka hadlaa?

Ka hadal arrimaha ku saabsan:

- Qofka adiga kuu samaynaya wax doorashada
- Sidii ay u samayn lahaayeen wax kala doorashooyinkaas
- Himilooyinka aad ka leedahay daryeelka caafimaad haddii aad leedahay dhaawac daran, oo joogto ah oo ku yimaad maskaxdaada
- Muxuu noqonayaa dhaawaca aad ku dhihi karto adigu, “Ha isticmaalina daaweyn caafimaad sidii aniga heerkaas aad ugu noolaan lahayd.” Dad badan ayaa dhaha “waxaan geesinimo lagu helaa ma jiraa” Ama “Haddii aan maral noqonayo, aan iska rawaxo.” “Ha ku haynina noloshayda mashiino.” Lakiin kelmadahani uguma filanna gaar ahaantooda hagitaanka go'aan-samaynta.

Waa inaad sifeysaa sida iyo marka u daryeelku yahay mid looga beddelo nolol ku haynta oo mid lagugu daayo inaad si dabiiciga ah u geeriyooto. Mararka qaarkood, daaweynta qaarkood ayaan laga yaabaa ineyna waxba kaaga tarin kaga soo kabasho nolol tayo keh oo adigu aad rabto. Miyaan u baahanahay inaan la hadlay? Iswaydii arrinka:

- Goorma ayaan dooni in la iigu sii wado daaweynta si aan iskugu dayo inaan noolaado oo raadiyo bogsasho?
- Goorma ayaan anigu dooni inaan joojiyo daaweynta qaarkeed oo aan aqbali doonaa geerida?
- Goorma ayaan dooni anigu dareyeel raaxo? Waa maxay noocyada daryeel raaxo ee aan anigu dooni (tusale ahaan, dawo ama taageero diineed)?

Miyaan u baahanahay inaan la hadlo dhakhtarkayga?

La hadalka dhakhtarkaaga ayaa waxtar yeelan karta. Dhakhtarkaaga ayaa eegi kara inuu dardaarankaaga daryeel caafimaad bayaan iyo mid dhammaystiran yahay. Dhakhtarkaaga ayaa waliba kuu sheegi kara inuu waliba daryeelkaaga caafimaad u taageri karo waxa aad rabto iyo in kale.

Twin Cities Medical Society

TALEEFAN: 612-362-3704

WEB: www.MetroDoctors.com

Xuquuq-daabac 2000-2011. Dhammaan xuquuq dhowran. Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc. Loo isticmaaly fasax laga qaatay Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc.

CPR

Waxa ah inaad ka ogaato u qorsheynta hore ee daryeelka

CPR (wadno-sambabbo shaqo ugu soo-celin) wuxuu kordhiyaa fursadha lagaga kabto haddii u neefisgu kaa joogsato ama waxdnaahugu garaaciisu joogsado. CPR waa habsocod hawl gargaar deg-deg ah oo iskugu dayo inuu wadnahaagu u ku sii wado shaqeynta oo oksijiintu ku shubanto maskaxdaada.

Waa kuwan macluumaad kaa caawin karta inaad go'aansato haddii aad rabto CPR. Waqtiga go'aankan laga gaarayo ayaa ah markaad ogtahay xaqiiqda oo aad karti u leedahy inaad sameeyso wax kala doorashadaada. La hadal dhakhtarkaaga sidii aad u fahmi lahayd waxay halisaha iyo waxtarrada gaarka ahi ay noqon karaan isticmaalka CPR. Haddii ay waxtar leedahay, waliba kala hadal ehelkaaga iyo dadka kugu dhow, ama la-taliyeyaasha diineed ama ruuxiyanka ah. Waxay kaa caawin karaan qaab-socodka go'aanka, laakiin go'aansiga adiga ayay kugu xiran tahay.

Sidee CPR loo sameeyaa?

CPR-ka waxa ka qayb qaata qof kale:

- Ku neefisga afkagaa iyo xabadkaaga (shafkaaga) oo ohoos loo cadaadiyo (riixo)
- Iyada oo la isticmaalo daawo iyo qalab gaar ah sidii loo siin lahaa ka-gariirin koranto wadnaha si u wadnuhu shaqeeyo.
- Iyada oo la dhex dhiigo tuubbo dhuuntaada sidii ay kaaga caawin lahayd neefsiga

CPR-ku ma shaqeeyaa?

CPR-ku ku-guuleysigiisu uma badna sida dad badani u maleynayaan. Isbitaalka marka la joogo, in ka yar 1 marka loo eego 5 qof (boqollay 17) ayaa nasiib u hela inay ka soo kabtaan. Dadka da'da weyn, ee jilicsan ee ku nool guryaha guryaha xannaanaynta, qiyaastii 1 qof 30kiiba (3 boqollay ahaan) ayaa ka kabta kadib CPR-ta.

CPR-ta ayaa sida ugu wanaagsan u shaqeysa haddii:

- Waxaad lagu siin doontaa CPR-ta gudahooda woxoogaa daqiiqo markuu wadnahaaga iyo sambabadaadu shaqadooda joojiyaan
- Adiga sida kale caafimaadkaagu wuu iska fiican yahay

CPR-ku si fiican uma shaqeeyo marka loo eego sida kale haddii:

- Aad leedahay dhibaatooyin caafimaad oo waqti-dheer qaatay
- Aad leedahayxanuun aan hadda waxa ka dambeeyaa aan lagu guuleysan karin daaweyntiisa
- Aad da' weyn tahay oo aad diciif tahay

Maxaa dhacaya kadib CPR-ta?

Kadib CPR-ta, waxa laga yaabaa wali inaad sii lahaato dhibaatooyin kale.

- Waxa u baahan tahay in lagu saaro mashiinka neefsiga woxoogaa muddo ah maadaama ay sambabadaadu diciif yihiin
- Waxa laga yaabaa inaad u baahato in lagugu daryeelo xubinta daryeelka dhammayskatiran (ICU)

KA SII SOCDA DHABARKA

CPR

KA YIMID XAGGA HORE

- Waxa laga yaabaa inaad yeelato dhaawac maskaxeed
- Waxa laga yaabaa inay feedhaha daawac kaa gaadheen

Maxaan ku go'aansam karaa inaan rabo CPR?

Inay kaa caawiso gaaritaanka go'aanka, ka fikir tayada nolosha aad lahaan doonto kadib CPR-ta. Isweydii wax aad dooni lahayd inaad samayso haddii:

- Aadan neefsan karin iyada oo aan mashiin ku saarnayn waqti-dheer ama waligeedba
- Aadan fikiri karin ama aadan hadli karin
- Aadan qofna garanayn

Maxaa dhici doona haddii aan go'aansado inaan rabin CPR?

Haddii aad doorato inaad rabin CPR, wali waxaad heli doontaa daryeelka aad u baahan tahay. Kala doorashooyin badan ayaa jira sidii ay kaaga caawin lahayd inaad raaxo kuugu noqoto oo aad noolaato sinta suurtagalka ah.

Si loo dhowro xuquuqdaada oo kooxda daryeelkaaga caafimaad u fuliyaan waxyaabaha aad ka rabto CPR, samayso Dadaaranka daryeelka caafimaadka. U sheeg wakiilkaaga daryeelka caafimaad iyo kooxda daryeelkaaga. Dardaaranka hore ee daryeelka caafimaad ayaa ka caawiya qof kasta sidii ay ugu qorsheynsan lahaayeen waxyaabaha aan la malaysan karin.

Twin Cities Medical Society

TALEEFAN: 612-362-3704

WEB: www.MetroDoctors.com

Xuquuq-daabac 2000-2011. Dhammaan xuquuq dhowran.

Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc.

Loo isticmaaly fasax laga qaatay

Gundersen Lutheran Medical Foundation, Inc.

Wakiil daryeel caafimaad

Adiga waxa laguu doortay inaad _____ u noqoto wakiilka daryeelka caafimaad.

Waa kuwan macluumaad kaa caawiya inaad fahanto waxay ka dhigan tahay ahaanshaha wakiil daryeel caafimaad iyo sida la iskugu diyaariyo kaalintan.

Waa maxay wakiilka daryeelka caafimaadka?

Wakiilka daryeelka caafimaad waa qof loo doorto inuu u sameeyo go'aannada daryeelka caafimaad qof aan karti u lahayn go'aannada iskood u sameeyaan. Go'aannadan ayaa laga yaabaa inay ku saabsanaan daryeelka dhammaadka-nolasha. Badiyaa, hal ama dhakhtar ka badan ah ayaa go'aamiya marka u qofku go'aannadisa iskiis oo samayn karin.

Maxay ka dhigan tahay ahaanta wakiilka daryeelka caafimaad.

Ahaanta wakiil daryeel caafimaad qof ayaa micnihuusu yahay samaynta go'aannada u qofkaasi samayn lahaa haddii u karti u lahaan lahaa. Qofka ayaa adiga kugu aamminaya inaad u raacdo wuxuu rabo.

Wakiilka daryeelka caafimaad ayaa ah inuu karti ugu yeesho inuu uga jawaabo “haa” su'aalahan:

- Anigu miyaan oggolahay inaan kaalintan iyo xilkan qaado?
- Ma aqaan waxyaabaha u qofku ka rabo go'aannada caafimaad ee mustaqbalka?
- Anigu ma samayn karaa go'aannada ay aniga iga rabaan inaan sameeyo, xitaa haddii aan anigu aanan ku raacsanayn?

- Anigu ma samayn karaa go'aanno muhiim ah markaad ku hoos jiro xaalad xaalad ciriiri ah?

Haddii aad “Maya” uga jawaabto mid kasta oo ka mid ah su'aalahan, kala hadal waxyaabaha aad ka welwelsan tahay qofka adiga ku doortay.

Maxaa go'aammo ah ee aan anigu samayn doonaa markaan ahay wakiilka daryeelka caafimaad.

Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka samayso go'aanno waxa ku saabsan:

- Daryeelka iyo adeegyada caafimaad, ee ay ka midka yihiin baaritaanka, daawada iyo qalliinka
- Joojinta daaweynta, haddii ay tani tahay wax qofku u sheegtay ee u rabo ama danahiisa ugu wanaagsan ah
- Ka tajumaadda waxyaabaha u qofku rabay
- Dib-u-eegga iyo sii-deynta diiwaannada caafimaadka ayaa ah
- Qofka oo loo wareejiyo xarun daryeel oo kale
- Doorashada hawl-yaqaanka caafimaad iyo ururrada bixinaya daryeelka

KA SII SOCDA DHABARKA

Wakiilka daryeelka caafimaad

KA YIMID XAGGA HORE

Sideen anigu iskugu diyaarin karaa laftaydu inaan noqdo wakiil daryeel caafimaad

Kala hadal qofka adiga kuu doortay wakiil ahaan markuu qofkaasi sikiis u samysan karo wax akal doorashooyinkiisa. Faham waxayaabaha u qofkaasi ka rabo daryeelkiisa caafimaad ee mustaqabalaka. Hubi inaad kala hadasho arrimaha ku saabsan go'aannada caafimaadka ee laga yaabo inay iman karaan nolosha dhammaadkeeda. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad la hadasho mararka qaarkood sidii aad u hubin lahayd inuuna isbeddelin waxa u qofkaasi doortay.

Mararka qaarkood ayay dadku sameeyaan kelmado guud oo ku saabsan waxyaabaha ay ka rabaan xaaladaha qaarkood:

- “Anigu waxaan rabaa inaan si sharaf leh u geeriyoodo.”
- “Nolosha ha igu deynina haddii aan noqdo maral maskaxda laga xaal waayo.”
- “Kaliya iiga raaxeeya”

Kelmadahan oo kale ayaa micno kala duwan siinaya dadka kal duwan. Weydii qofka adiga kaa dhigtay wakiilka inuu si faahfaahsan kuugu sheego waxay arrinta micnaheedy yahay.

Dadka qaarkood ayaa ah raba inuu wakiilkooda daryeel caafimaad uu raaco waxay sheegteen si toosan. Dadka kale yaa

raba inuu wakiilkooda leeyahay dabacsanaan markay go'aanka sameynayaan. Soo ogow inta dabacsanaanta aad adigu leedahay. Weydii:

- “Way ka muhiimsan tahay inaad raacdo tilmaamahaaga toos ahaan sidi ay u qoran yihiin?”
- “Ama, miyaan la qaddariyaa tilmaamahaaga oo ay macluumaadka kale la socdaan iyo sida ugu wanaagsan ee ay u egtahay markaas?”

U raac qofka ballamaha dhakhtarka markay suurtagal tahay. Adiga iyo dhakhtarka ayaa isbaran kara. Weydii su'aalo ku saabsan xaaladda caafimaadka qofka iyo doorashada ku saabsan daryeelkiisa.

Waxa dhici karta inaad u baahato inaad la hadahso hawl-yaqaannada kale ee caawiya dadka sameeya go'aannada caafimaad. Waxay ka mid yihiin u fududeyaasha, shaqaalaha bulsheed, iyo madaxda diineed ama ruuxiyanka ee qorsheynta hore ee daryeelka.

Xasuuso: Ka hadalka arrimahan ayaa lagaa yaabaa inay adkaato. Laakiin kolba markaad fahamto oo aad kala caddayso waxa u qofku rabo, ayaad dareemi kartaa kalsooni inay u noqdaan wakiilkooda daryeel caafimaad. U welwelka iyo u heellanaantaada aya dhab ahaanti ah ficil jacayl.

Twin Cities Medical Society

TALEEFAN: 612-362-3704

WEB: www.MetroDoctors.com

Xuquuq-daabac 2000-2011. Dhammaan xuquuq dhowran.

Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc.

Loo isticmaaly fasax laga qaatay

Gundersen Lutheran Medical Foundation, Inc.

Ka caawinta neefsiga

Maxaa ah inaad ka ogaato u qorsheynta hore ee daryeelka

Haddii aad dhibaato ka qabto sambabka oo mararka qaarkood ay kugu adag tahay inaad neefsato, waxaad leedahay wax kala doorasho ku saabsan arrimaha ka caawinta si ka sahlan aad ugu neefsato. Kala doorashooyinkan waxa ka mid ah:

- Iyada oo qofka la saaro mashiinka neefsiga loo yaqaan hawo-siiyaha (**ventilator**)
- Iyada oo la isticmaalayo waji-gashi (maaskaro) loo yaqaan **BiPAP** (cadaadis hawo-mareen qumman laba-heer leh)
- Qaadasho **dawo**

Waa kuwan macluumaad kaa caawin kara inaad go'aansato haddii aad rabto in lagaa caawiyo neefsigaaga. Waqtiga go'aankan la gaarayo waa markaad ogtahay xaqiiqda oo aad karti u leedahay inaad sameyso wax kala doorashadaada. La hadal dhakhtarkaaga sidii aad u fahmi lahayd waxay halisaha iyo waxtarrada gaarka ahi ay noqon karaan marka la isticmaalo hawo-siiye ama BiPAP. Haddii ay waxtar leedahay, waliba kala hadal ehelkaaga kuugu dhow, ama la-taliyeyaasha diineed ama ruuxiyanka ah. Waxay kaa caawin karaan qaab-socodka go'aanka, laakiin go'aansiga adiga ayey kugu xiran tahay.

Waa maxay Hawo-siiyahu (ventilator)?

Hawo-siiyahu waa mashiin ku riixa hawada iyo oksijiinta sambabadaada sidii ay kaaga caawin lahayd neefsiga. Mashiinka ayaa ku xiran tuubbo afka inta lagaa galiyo oo dhex marta hawo-mareenka ee xagga dambe ee cunaha iyo dhuunta ah. Hawo-mareenkaaga ayaa hawada soo galiya oo ka saara jirkaaga. Ma hadli kartid ama waxaba ma liqi kartid marka u hawo-siiyahu (ventilator) ku jiro hawo mareenkaaga. Si lagaaga caawiyo inaad deggenaato oo tuubbadu halkeeda ku ekaato, waxaad u baahaneysaa woxoogaa dawo ah. Markuu hawo-siiyuhu ku saaran yahay, waxa lagugu daryeeli doonaa xubinta daryeelka dhammaykatiran (ICU).

Waa maxay BiPAP?

BiPAP waa daawayn oksijiinta ku riixda sambabbadaada iyada oo loo maro waji-gashi (maaskaro). Waji-gashiga ayaa si fiican u le'eg sankaaga iyo afkaaga. Waji-gashiga ayaa laga yaabaa inuu noqdo bilaa raaxo. Hawada ayaa dhex-gali karta calooshaada oo xanuun u horseedi karta. Waxa laga yaabaa inuu hadalku kugu adkaado.

Hawo-siiyaha ama BiPAP wax ma taran?

Hawo-siiyaha ama BiPAP waxay sida fiican u shaqeeyaan haddii:

- Haddii dhibaataada sambab wax laga qaban karo.

Ka caawinta neefsiga

KA YIMID XAGGA HORE

- Waxaad ugu baahan tahay neefsiga waqti gaaban si aad uga soo kabato qalliin ama xanuun lama filaan ah.

Hawo-siiyaha ama BiPAP ayaan si fiican u shaqayn haddii:

- Jidhkaagu is-xidhayo (shaqada joojiyo) awgeed dhibaatooyin caafimaad wakhti-dheer qaatay
- Aad leedahayxanuun aan hadda waxa ka dambeeyaa aan lagu guuleysan karin daaweyntiisa
- Inaad karti u lahayn u adkeysiga qulqulka hawada cadaadiska-sare leh ee loogu baahan yahay inay oksijiintu gasho oo ka soo baxdo sambabbadaada

Sideen ku go'aansadaa haddii aan rabo inaan isticmaalo hawo-siiye ama BiPAP?

Si ay kaaga caawiso go'aanka, tixgali tayada nolosha ee aad yeelan doonto isticmaalka neef-siiyaha ama BiPAP. Isweydii wax aad dooni lahayd inaad samayso haddii:

Pregúntese que le gustaría hacer si:

- Hawo-siiyaha ama BiPAP uuna shaqayn
- Caafimaadkaaga oo ka sii dara
- Aadan fikiri karin ama aadan hadli karin

Maxaa dhacaya haddii aan go'aansado aanan anigu rabin hawo-siiyaha ama BiPAP?

Haddii aadan karti u lahayn inaad u neefsato iskaa ama lagu caawiyo, si dabiici ah ayaad u geeriyoon doontaa. Haddii aad go'aansato inaad rabin inaad isticmaasho mashiin neefsasho, ama aad dawayso dhibaataadaada sambab, waxa laga yaabaa inay cabsi kuu yeelato inad ka fikirto karti la'aanta neefsiga. Hase yeeshee, waxyaabo kala doorashooyin badan ayaa la heli karaa sidii lagaaga caawin lahaa raaxadaada.

Waxaad qaadan kartaa dawo kaa caawisa inaad degto, cabsidu kaa yaraato oo aad wax ka qabto dhibaataada neefsiga sida ugu suurtagalka badan. Waxa kale oo aad ka qaadan kartaa oksijiinta tuubbo lagaa galiyo sanko, ama waxaad isticmaali karti wardis ama salaad ayaad tukan kartaa si aad raaxo u yeelato.

Si loo dhowro xuquuqdaada oo kooxda daryeelkaaga caafimaad u fuliyaan waxyaabaha aad ka rabto hawo-siiyaha ama BiPAP, samayso Dadaaranka daryeelka caafimaadka. U sheeg wakiilkaaga daryeelka caafimaad iyo kooxda daryeelkaaga. Dadaaranka hore ee daryeelka caafimaad ayaa ka caawiya qof kasta sidii ay ugu qorsheysan lahaayeen waxyaabaha aan la malaysan karin.

Twin Cities Medical Society

TALEEFAN: 612-362-3704

WEB: www.MetroDoctors.com

Xuquuq-daabac 2000-2011. Dhammaan xuquuq dhowran.

Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc.

Loo isticmaaly fasax laga qaatay

Gundersen Lutheran Medical Foundation, Inc.

Quudinta tuubbada

Maxaa ah inaad ka ogaato u qorsheynta hore ee daryeelka

Quudinta tuubbada ayaa dariiq lagugu siiyo adiga cuntada iyo bixiyaha haddii aadan karti u lahayn inaad wax u liqdo sida caadiga ah ama aadan karin inaad qaadata cunto ama biyo kugu filan. Kolba markaad sii weynaato ama haddii aad yeelato dhibaatooyin caafimaad, liqitaanka iyo helitaanka cuntada iyo biyo kugu filan ayaa sii adkaaneysa.

Waa kuwan macluumaad kaa caawin kara inaad go'aansato haddii aad rabto in lagaa caawiyo neefsigaaga. Waqtiga go'aankan laga gaarayo ayaa ah markaad ogtahay xaqiiqda oo aad karti u leedahay inaad sameyso wax kala doorashadaada. La hadal dhakhtarkaaga sidii aad u fahmi lahayd waxay halisaha iyo waxtarrada gaarka ahi ay noqon karaan marka lagu quudiyo ttunbada. Haddii ay waxtar leedahay, waliba kala hadal ehelkaaga iyo dadka kugu dhow, ama la-taliyeyaasha diineed ama ruuxiyanka ah. Waxay kaa caawin karaan qaabsocodka go'aanka, laakiin go'aansiga adiga ayay kugu xiran tahay.

Sidee loo sameeyaa quudinta tuubbada?

Hababka quudinta tuubbada waxa ka mid ah dhex dhigitaanka tuubbada:

- La mariyo sankaa oo markaa la dhexgaliyo calooshaada
- La mariyo maqaarka oo markaa la dhexgaliyo calooshaada

Cuntada (nafaqada) iyo biyaha ama dareeraha kale ayaa si qun yar loogu shubaa tuubbada.

Ma shaqeysaa quudinta tuubbada?

Quudinta tuubbada ayaa sida ugu wanaagsan u shaqeysa haddii:

- waxaad ugu baahan tahay quudinta tuubbada waqti gaaban si aad uga soo kabato qalliin ama xanuun lama filaan ah
- Haddii kalese adigu waxaad guud ahaan leedahay caafimaad wanaagsan

Ku quudinta tuubbada ayaan si fiican u shaqaynaynin haddii:

- Jidhkaagu u ku sii noqonayo diciif dhibaatooyin caafimaad muddo-dheer jiray

- Aad leedahayxanuun aan hadda waxa ka dambeeyaa aan lagu guuleysan karin daaweyntiisa
- Aad da' weyn tahay oo diciif aad tahay

Waa maxay halista ka iman karta isticmaalka quudinta tuubbada?

Ku quudinta tuubbaada ayaa u horseedi karta dhibaatooyinka qaarkood.

- Cuntada ayaa ku quban karta dhexdooda sambadaada oo u horseedi karta infekshin (oof-wareen tusaal ahaan)
- Dareerayaasha ayaa ka dhex buuxsami kara haddii uuna jidhkaagu si fiican u shaqaynaynin oo karti uuna lahayn inuu isticmaalo cuntada iyo biyaha

KA SII SOCDA DHABARKA

Quudinta tuubbada

KA YIMID XAGGA HORE

- Dareerayaasha ka buuxsama sambabbadaada, calooshaada, gacmahaaga iyo meelaha kale ka mid ah jidhka ayaa laga yaabaa inay noqdaan raaxo-la'aan
- Waxa laga yaabaa in loo baahdo in gacmahaaga la xidho si aadan iskaga saarin tuubbada quudinta

Sideen ku go'aansam karaa inaan u baahanayhay quudinta tuubbada?

Inay kaa caawiso gaaritaanka go'aanka, ka fikir tayada nolosha aad lahaan doonto kadib CPR-ta. Isweydii wax aad dooni lahayd inaad samayso haddii:

- Ku quudinta tuubbada oo aan shaqayn
- Caafimaadkaaga oo ka sii dara
- Aadan fikiri karin ama aadan hadli karin

Maxaa dhici doona haddii aan go'aansado inaan rabin quudinta tuubbada?

Cunto iyo biyo la'aan, waxaad u dhiman geeriyoon doontaa si dabiici ah. Gaajo dareemi meysid, in kasta oo laga yaabo inaad dareento oomanaan oo aad yeelan doonto yeelan doono ingeeg afka ah. Falliidhyo baraf ah ayaa ka caawin oon baxa.

Waxa laga yaabaa inay noqoto cabsi in laga fikiro waxa ku saabsan helitaanka cuntada iyo biyaha. Laakiin kala doorashooyin badan ayaa jira si ay kaaga caawiyaan inaad raaxo kuu noqoto oo aad noolaato inta suurtagalka ah.

Si loo dhowro xuquuqdaada oo kooxda daryeelkaaga caafimaad u fuliyaan waxyaabaha aad ka rabto CPR, samayso Dadaaranka daryeelka caafimaadka. U sheeg wakiilkaaga daryeelka caafimaad iyo kooxda daryeelkaaga. Dardaranka hore ee daryeelka caafimaad ayaa ka caawiya qof kasta sidii ay ugu qorsheynsan lahaayeen waxyaabaha aan la malaysan karin.

Twin Cities Medical Society

TALEEFAN: 612-362-3704

WEB: www.MetroDoctors.com

Xuquuq-daabac 2000-2011. Dhammaan xuquuq dhowran.

Gunderson Lutheran Medical Foundation, Inc.

Loo isticmaaly fasax laga qaatay

Gundersen Lutheran Medical Foundation, Inc.